UNITED NATIONS NATIONS UNIES

Office for the Coordination of Humanitarian Affairs – Somalia

Warbixinta Xaaladda #44 – 07 November, 2008

Is-beddellada guud ee ugu muhiimsan

Weli waxaa sii kordhaysa weerarada lagu bartilmaameedsanayo shaqaalaha gargaarka ee Soomaaliya, iyo xaaladda ammaan darrida ah oo ka sii dartay, kaddib markii fursadaha hawlaha bini'aadminnimadu ay meel shakal ah sii galeen 5tii November, kaddib markii afar khabiir oo u shaqayn jiray hay'adda la dagaallanka Gaajada (ACF), ay rag dabley ahi af-duubeen iyagoo markaas ku sii jeeday garoonka Dhuusamarreeb ee gobolka Galgaduud. War-saxaafdeed ay hay'adda ACF soo saartay ayey ku sheegtay in afarta khabiir ee la af-duubay ay weheliyeen labo duuliye oo reer Kenya ah.

Waxaana af-duubkaas loo soo jeediyey cambaarayn xoog leh oo ka timid Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, si qoto-dheerna u tilmaamay xaaladda murugada leh ee dilka iyo af-duubka ka dhanka ah shaqaalaha gargaarka ee ka howl-gala Soomaaliya. Hay'adda ACF, ayaa waxay Soomaliya ka shaqaynaysay ilaa 1992kii, iyadoo afarta qof ee la afduubay ay ka mid ahaayeen 14ka khabiir iyo 220ka shaqaale maxaliga ah oo ka shaqeeya barnaamijyada meel-marinta hawlaha gargaarka ee Gobollada Koofurta/Bartamaha Soomaaliya. Ilaa bishii January, 23 qof oo shaqaalaha gargaarka ka tirsan ayaa lagu dilay Soomaaliya, iyadoo ilaa 14 ka mid ah weli la af-duub loo hasyto.

Khabiirka madaxa-bannaan ee xaaladda Xuquuqul-insaanka dalka Soomaaliya, Dr. Shamsul Bari, iyo hay'adda UNICEF, ayaa wadajir ahaan u cambaareeyey gabadhii dhagaxa lagu dilay ee lagu xukumay inay Sinaysatay. War-saxaadafeed ay hay'adda UNICEF soo saartay 4tii November, ayaa shaaca kaga qaadday in Caasha Duhulow dhagax lagu dilay 27kii Oktober iyadoo ay daawanayaan dadweyne aad u tiro badan. Waaxaana dhacdadaas lagu fuliyey gudaha garoonka Kismayo xarunta Gobolka Jubbada hoose. Waxaana warbixintu sheegtay in gabadhaas la kufsaday, dabadeenda ay badbaado u raadsatay maamulka, balse iyada lagu eedeeyey inay Sinaysatay, dabadeedna dil lagu xukumtay. Dilkii magaalada Baydhabo ee gobolka Bay loogu geystay Ms. Mariam Aden Mohamed, oo ahayd Guddoomiyihii Ururka Haweenka ee Difaaca xuquuqul-insaanka ee 3dii November, ayaa isna waxaa dareen qalafsan ka muujiyey khabiirka madaxa-bannaan ee Xuquuqul-insaanka. War-saxaafadeed uu soo saaray 5tii November, ayaa Dr. Bari, wuxuu cambaareeyey mawjadaha xiisadaha imminka ka jira Soomaaliya. Wadar ahaan 33 qof oo ka mid ahaa shaqaalaha gargaarka, ayaa naftooda qaaliga ah ku waayey ilaa Bishii January ee 2008.

Dilkii labo ka mid ahaa shaqaalaha Qaramada Midoobay ee Qarixii 29kii Oktober Hargeysa, Somaliland, ayaa waxaa war-saxaafadeedkii 30kii Oktober uu soo saaray Guddoomiyaha Golaha Ammaanka QM ku cambaareeyey weerarkii Xarunta UNDP lagu qaaday. Sida uu qoray war-saxafadeedkaas, "wuxuu Golaha Ammaanka hoosta ka xariiqayaa in sharciga la hor-geeyo dambiilayashii, abaabulayaashii, maalgeliyayaashii iyo dhamman ciddi ka dambaysay falkaas argagaxisanimada ah.."Wuxuu kaloo Goluhu dhambaal tacsiyeed u diray qoysasakiii dhibbanayaashii weerarkaas ku waxyeeloobay.

Ugu yaraan 12 qof oo la socday Dooni, ayaa ku qaraqmay 2dii November, Gacanka Cadmeed iyagoo ku sii jeeday dalka Yemen. Waxayna ka mid ahayeen 115 qof oo la wada socday hal Doon kuwaasoo intooda badan ay Soomaali iyo Ethiopian ahaayeen, laguna khasbay inay gunta hoose ee biyaha badda ee xeebahaYemen isku tuuraan. Sida ay sheegtay hay'adda UNHCR, in ka badan 38,000 qof ayaa gaadhay xeebaha dalka Yemen ilaa January ee 2008. ilaa 577 qof oo Soomaali ah ayaa ku dhintay, iyadoo ilaa 296 qof oo kalena weli la la' 'yahay meel ay ku dambeeyeen, balse loo aqoonsaday inay dhinteen. Sannakii tegay, 29,500 qof, ayaa isla safarka caynkaas ah sameeyey. Iyadoo ay weli soo socdaan xiisadaha ammaan darrida ah iyo caqabadaha hortaagan fursadaha hawlgalka Soomaaliya, ayaa dhawaan waxay QM qaar ka mid ah goobaha qaarkood ee ay ka hawlgasho ka soo daad-guraysay, islamarkaana ay dhintay tirada shaqaalaha goobaha ka hawlgalaya. Dadaalka la xidhiidha qaabka sii socoshada hawlgallada suuragalka ah, ayaa waxay WFP, jaangoysay Kooxda Taageerada Gurmadka Deg-degta ah ee saldhigeedu yahnay gobolka waqooyi-bari ee Kenya ee xadka la wadaaga Soomaaliya. Tani waxay shaqaalaha u fududayn doontaa inay ka hawlgalaan gobo ku dhaw Soomaaliya, iyagoo adeegyada hawlgalladoona halkaas ka fulin doona. Waxaa kaloo suurtagal ah in sahan lagu sameeyo hawlgallada dib loogu noqonayo dalka Soomaaliya. Dhanka kale, markabka ciidamada badda Holland iyo labo markab oo kuwa dagaalka ah ee ciidammada NATO oo ay leeyihiin waddamada Giriigga iyo Talyaaniga, ayaa si nabadgalyo ah ku gelbiyey afar markab oo siday raashinka badbaadada nolosha bulshada oo wadar ahaan gaadhayey ilaa 25,000 metric tons oo dalka Soomaaliya la geeyey intii u dhaxaysay 26kii Oktober iyo 1dii November.

Gurmadka

Waxay UNICEF ku hawlan tahay adeegyada dhinaca badbaadada iyo waaxda daryeelka carruurta nafaqo-darrida ba'an hayso iyo xanuunnada culus ee bukaannada ee Cisbitaalka Baydhabo, gobolka Bay. Waaxdani waa tii ugu horraysay ee nooceeda ah ee laga furo Baydhabo, iyadoo adeegyada imminka laga heli karo ay gaarayaan qiyaastii ilaa 16,000 carruurta da'doodu ka yar tahay shanta sano ee Baydhabo iyo ilaa 33,000 qof oo kale oo ku dhaqan nawaaxiga magaalada Baydhabo.

Intii u dhaxaysay 21kii iyo 22kii Oktober, waxaa si wadajir ah raashinka nafaqada isku-dhafan leh u qaybiyey hay'adaha kala ah; Golaha Qaxootiga Denmark (DRC), WFP iyo UNICEF, kaasoo gaarayey ilaa 10 kg ee noocyada nafaqada isku-dhafan (UNIMIX), ayna ka faa'iidaysteen ilaa 6,585 carruurta da'doodu ka yar tahay shanta sano ee ku dhaqan goobaha dadka soo bara-kacay ee Bossaso, Puntland.

Isla toddobaadka gudihiisa, waxay WFP iyo hay'adda maxalliga ah (NGO GECPD) wadajir ahaan u qaybiyeen noocyada cuntada gargaarka ah oo dhan ilaa 80 metric tons, looguna talo-galay ilaa 849 haweeka soo bara-kacay ee ka qayb galayey Mashruuca Tababarrada cuntada lagu beddelanayo ee Gaalkacyo, gobolka Mudug.

Wixii Faahfaahin Dheeraad ah ee xogta Afka Ingriiska kala xidhiidh: Rita Maingi tel. 254 734 800 120 – *maingi@un.org*,
Xogta Afka Soomaaligana kala Xidhiidh: Mona Mohamed on 0733 643 737 – mohamed26@un.org
Cinwaanka Shabakadda:http://ochaonline.un.org/somalia